

Sida Loo Buuxiyo Shahaadada Dib U Soo Celinta Fursadda (Qarinta Dambiyada Diiwaankaaga Ku Jira)

Waa maxay Shahaadada Dib U Soo Celinta Fursadda (CROP)?

CROP waa amar maxkamadeed oo madani ah oo laga diiwaangeliyo maxkamadda kaasoo lagu amrayo

- yareynta caqabadaha
- dibna u soo celinayo helitaanka ogolaashaha (leesinka) xirfadaha.

Qoraalka waa mid dadweynuhu arki karaan waxaana uu bilow u noqonayaa dacwad madani ah oo maxkamadeed.

Ilaalinta macluumaadka shaqsiga ah ee laga yaabo in ay ku qoran yihiin warqadaha aad maxkamadda ka diiwaan gelisay. Khad madow mari (tirtir) si aanu qofna u akhrin karin lambarkaaga bulshada, lambarka xisaabaadka bangiga, iyo lambarka ogolaashaha wadidda gaadiidka haddii ay ku qoran yihiin warqadaha **ka hor** inta aadan ka diiwaan gelin maxkamadda.

Raac talo soo jeedinta hoose si aad maxkamadda u weydiisato CROP.

Si la akhrin karo u qor! Fadlan isticmaal qalin madow ama buluugah oo kaliya.

Buuxi foomka *Codsiga Shahaada Dib U Soo Celinta Fursadda* , ee CRO 01.0100

1. Dhinaca hore ee bogga ugu horeeya ku qor magaca degmada goobta aad dooneyso in aad ka diiwaangeliso codsiga.
2. Magacaaga ku qor Codsiga
3. Qeybta hore, maxkamadda u sheeg dambiyada horey loogu helay ama qaaday oo aad dooneyso in Shahaadada Dib U Soo Celinta Fursadda (CROP) lagu caddeeyo.

Dooro godka ugu horeeya haddii aad CROP u codsaneyso dhamaan dambiyada horey laguugu helay iyo kuwa lagu qaaday ee ku cadeysay codsiga.

Dooro godka labaad haddii aad dooneyso in CROP ay kguseyso qaar ka mid ah dambiyada horey laguugu helay ama qaaday, kuwaasi waxa ay noqon karaan dambiyada lagu helay ama qaaday ee kaa hortaagan ama caqabadda kugu ah.

Jadwalka ku qor dambiyada laguugu helay ama qaaday ee aad dooneyso in lagu sheego CROP soona raaci macluumaadka lagaa codsaday.

4. Ku qor taariikhda halka loogu talo galay kuna saxiix magacaaga.

Codsigaaga halkaas aayuu ku dhamaaday, markan waxaa lagaa doonayaa in aad buuxiso caddeynta.

Bogga 2aad ee hoose "Caddeynta Codsadaha", ku qor magacaaga sadarka banaan. Tan waa caddeyntaada

Qeybta 1aad: Codsigaaga waa in aad ka diiwaan gelisaa maxkamadda awoodda u leh. "Maxkamadda Awoodda U Leh" waa Maxkamadda Sare ee degmada.

- a. ee halka aad degan tahay ama
- b. goobta dambiga lagaaga helay ama lagu qaaday ama
- c. goobta maxkamadda degmada ama ddegaanka ee dambiga kugu heshay ku taalo.

Dooro godka saxa ah.

Qeybta 2aad: Waa in aad u dirtaa *Ogeysiiska Diiwaangelinta Codsiga Shahaadada Dib U Soo Celinta Rajada* xeer ilaalinta degmada aad codsiga ka diiwaan gelisay.

Dooro godkan haddii lagugu xukumay degmo kale shantii sano ee la soo dhaafay. Waa in aad sidoo kale wargelisaa xeer ilaainta degmadaas.

Qeybta 3aad: Waa in aad ku qortaa dhamaan dambiyada lagu helay ama qaaday.

Si aad u buuxiso qeybtan waxaa laga yaabaa in ay ku caawineyso in aad soo qaadato diiwaanka dambiyada lagugu helay oo aad ka heli karto Waaxda Nabadgelyada ee Washington: <https://fortress.wa.gov/wsp/watch/>.

Degmadan: Ku biloow dambiyada lagugu helay ama qaaday ee aad ku gashay degmada aad ka diiwaan gelineyso codsigaaga CROP. Shaxda ku qor dambi kasta oo lagugu helay ama qaaday soona raaci macluumaadka lagaa codsaday.

Haddii aad u baahan tahay meel dheeraad ah oo aad ku qorto ku soo lifaaq waraaq cad oo aad ku qortay codsigaaga.

Kuwa ka baxsan Degmadan: Marka xiga qor dambiyada lagugu helay ama qaaday ee ku gashay ee ka baxsan degmada aad ka diiwaan gelineyso codsigaaga. Ku qor dambiyada aad ka gashay ama lagugu qaaday ee ka baxsan gobolka Washington, gobolada kale, maxkamadaha dawladda dhexe, maxkamadaha degmada iyo maxkamadaha degaanka.

Dooro godkan haddii aad u baahan tahay meel dheeraad ah oo aad ku qorto macluumaadka kuna qor waraaq cad kuna soo lifaaq codsiga.

Waxaa lagaa doonayaa in aad sharaxdo sababta aad u dooneyso CROP.

Qeybta 4aad: Ma ka soo baxday oo ma dhameysatay mudada lagu qabtay?

Mid kasta oo ka mid ah:

- Dambiyada hoose iyo kuwa dhexe ama kuwa u dhigma ee dambiyada caruurta lagu qaado;
- Dambiyada culus ee B iyo C ama kuwa u dhigma ee lagu qaado caruurta ama
- Xadgudubyada rabshaduhu wehliyaan sida lagu qeexay RCW 9.94A.030 ama dambiyada caruurta lagu qaado ee u dhigma.

Dooro godka khuseeya mudada lagu qabtay.

Qeybta 5aad: Waa in aad u hogaansanaataa **dhamaan** shuurdaha xukunka ee maxkamadda. Haddii aad ka soo baxday, dooro godkan.

Shuruudaha Xukunka. Ku soo lifaaq xukunka iyo magdhawga dusha lagaa saaray ama amarka dambi ku helista ee dambi kasta oo lagugu helay ee aad ku qortay qeybta 3aad kuna soo lifaaq cadeynta aad buuxisay ama in aad ka soo baxday shuruudaha xukunka ee dusha lagaa saaray.

Mas'uuliyadda Maaliyadeed ee Sharciga ah: Haddii ay jirto wax Mas'uuliyad Maaliyadeed oo Sharci ah (LSO) oo lagugu xukumay, dooro godka khuseeya soona raaci cadeynta aad heyso ee muujineysa:

- In aad bixisay lacagta oo dhan
- Aad u bixiso lacagta sidii aad heshiiska ku gashay
- In aadan bixintii lacagtii lagaa doonayey laakiin ay jirto sabab caqligal ah sababta aadan u raacin heshiiskii lagula galay.

In aad soo raaciso cadeynta LFO oo aad ku soso lifaaqdo codsigaaga;

- Xogheynta maxkamadda dambiga kugu heshay waxa aad weydiisataa in aad dooneyso:
 - Cadeyn in aad ka soo baxday xukunkii oo aad bixisay lacagtii lagugu xukumay oo dhan, ama
 - Taarikhda dacwadda oo ku cadahay lacagtii aad horey u bixisay.
- Haddii aadan bixin lacagtii LFO laakiin ay jirto sabab macquul ah oo aadan u bixin, qor sababta aad u bixin weysay lacagta.

Xusuusnoow in aad khad madow mariso si aanu qofna u akhrin karin lambarkaaga bulshada, lambarka xisaabaadka bangiga, iyo lambarka ogolaashaha wadidda .

Qeybta 6aad: Qeybtan akhri si aad u xaqiijiso in aan waligaa lagu helin dambi ka mid ambiyada hoos lagu xusay. Haddii lagu helay dambiyadan mid ka mid ah, xaq uma lihid CROP.

Qeybta 7aad: Si aad xaq ugu yeelato CROP, waa in aysan waajib kugu aheyn in aad is diiwaangeliso sidii qof galmoodka ku maman (falan) Xaq uma lihid CROP, haddii waajib kugu tahay in aad is diiwaangeliso sidii qof galmoodka ku maman (falan)

Qeybta 8aad: Akhri qeybtan. Si aad xaq ugu yeelato CROP, waa in aadan la imaan dambi cusub ka dib markii lagu helay dambiga

Qeybta 9aad: Qor cinwaanka laguugu soo dirayo warqadaha sharciga ah. Haddii ay maxkamaddu kuu qabato dhageysi ku saabsan codsiga CROP, waxa ay maxkamaddu ogeysiiska dhageysiga kuugu soo direysaa cinwaankan.

Saxiix cadeynta kuna qor goobta iyo taariikhda aad saxiixday caddeynta.

Diiwaan geli Codsiga

Codsiga oo ay ku lifaaqan yihiin dhamaan qoraalada la socda, oo ay ka mid tahay ogeysiinta aad u xeer ilaalinta, u soo gudbi xafiiska xogheynta Maxkamadda Sare.

Lacagta Diiwaan Gelinta: Lacag ayaa lagaa doonayaa lagu diiwan geliyo codsiga CROP. Haddii awoodin in aad bixiso lacagta diiwaan gelinta, waxa aad xogheynta weydiisan kartaa in aad codsato in lagaa daayo oo buuxiso foomka GR34. Waxa aad ka hgeeli kartaa bogga internetka ee maxkamadda:

<https://www.courts.wa.gov/forms/?fa=forms.contribute&formID=87>.

Wargelinta Xeer Ilaalinta

Waxaa waajib kugu ah in aad wergeliso xeer ilaalinta degmada aad ka diiwaan gelineyso codsigaaga. Haddii uu xukunkaaga ka dhacay degmo kale shantii sano ee la soo dhaafay gudahooda, waxaa waajib kugu ah in aad wargeliso xeer ilaalinta degmadaas (mooyinkaas).

Waxaa aad ugu diri kartaa foomka *Codsiga Shahaada Dib U Soo Celinta Fursadda*, ee CRO 01.0200, xeer ilaalinta adeegga gacan ka saarka ah ama boostada ayaad u dhigi kartaa. Ku lifaaq *Ogeysiiska Diiwaan Gelinta Codsiga Shahaada Dib U Soo Celinta Fursadda* ee codsada.

Adiga, ama qofka u diray wargelinta xeer ilaalinta, waa inuu buuxiyaa foomka *Cadeynta Adeegga Gaarsiinta Codsiga Shahaada Dib U Soo Celinta Fursadda*, CRO 01.0300, ee ogeysiiska loo diray xeer ilaalin kasta ee la gaarsiiyey ogeysiiska.

Ka diiwaan geli maxkamadda warqadaha *Adeegga Gaarsiinta* xogheynta maxkamadda sare ee aad ka diiwan gelisay codsiga.

Xeer laalinta degmada aad ka diiwan gelisay codsigaaga waa in ay maxkamadda u soo gudbiyaan diiwaanka fal dambiyeedkaaga oo dhan.

Go'aanka Maxkamadda

Waxaa laga yaabaa in maxkamaddu codsigaaga iyada oo aan dhageysi loo qaban. Maxkamadda ayaa ku soo wargelineysa haddii dhageyso la qabanayo.

Ka Qeybgalga dhageysiga maxkamaddu qabato.

Waxaa laga yaabaa in maxkamaddu diido (baabi'iso) codsigaaga. Haddii ay maxkamaddu diido codsigaaga, waa in maxkamaddu sharaxaad ka bixisaa sababta ay u diiday kuna caddeysaa *Amarka Diidamada ee Codsiga Shahaada Dib U Soo Celinta Fursadda* ee foomka CRO 01.0600.

Haddii maxkamaddu diido codsigaaga, waxa aad soo gudbin kartaa codsi ka dib marka aad wax ka qabato sababaha lagu diiday codsigii hore. Waxa aad ka diiwaan gelin kartaa isla degmadii hore ama degmo kasta oo maxkamadeedu awood u leedahay.

Haddii maxkamaddu ogolaato codsigaaga, maxkamaddu waxa ay soo saareysaa *Amarka iyo Shahaada Dib U Soo Celinta* ee foomka CRO 01.0700.

Kala soco xaaladda codsigaaga CROP:

- Haddii aad heli karto internetka, waxa aad ka baaran kartaa diiwaanka Maxkamaddaha Gobolka Washington ee <http://dw.courts.wa.gov/>.
- Waxa kale oo aad la xiriir kartaa xafiiska xogheynta maxkamadda sare ee ka diiwaan gelisay codsiga.

Muxuu ii tarayaa CROP?

1. Ogolaashaha Xirfadaha (Shatiyada) Qofka heysta CROP looma diidi karo ogolaashaha xirfadaha diidmadaas oo saabab looga dhigayo kaliya fal dambiyeed ku jira diiwaankiisa (marka laga reebo xaaladaha qaarkood)
2. Goobaha shaqada iyo mulkiilayaasha guryaha: waxaa laga yaabaa in ay tixgeliyaan CROP, laakiin sharci ahaan khasab kuma aha in ay u hogaansamaan.

Meelaha aanu saameynta ku laheyn CROP:

1. CROP ma khuseeyo xirfadaha qaarkood:
 - Ciidamada nabadgelyada
 - Ogolaashaha ku shaqeynta sharciga (qareen inaad noqoto)
 - Ogolaashaha ay qeyb ka yihiin mas'uuliyad maaliyadeed ama hawl lagu wakiilanayo arrimo maaliyadeed
 - Ogolaashaha qaarkood ee la xiriira dadka nugul
 - Ogolaashaha qaarkood ee la xiriira daryeelka caafimaadka
2. Hay'adaha bixiya ogolaashaha ayaa leh go'aan gaarista:
 - DSHS iyo DOH way diidi karaan ogolaashaha iyaga oo sabab uga dhigaya oo kaliya fal dambiyeed hore, xitaa haddii qofku heysto CROP, laakiin waa KALIYA haddii qofka ay wax ka weydiiyaan waxyaabaha ku saabsan:
 - Nooca fal dambiyeedka iyo sida uu khatar u yahay dambiga
 - Mudada ka soo wareegtay tan iyo intii lagu xiray
 - Isbedelka xaaladaha
 - Nooca shaqada/leesinka la doonayo

Waa maxay waxyaabaha uusan CROP UUSAN ii qaban karin:

1. Saameyn kuma yeelato is diiwaangelinta waajibka ah ee dayac ama xad aad geysatay.
2. In qofka loo soo celiyo ogolaashaha qaadashada hubka
3. Kama saarto (masaxdo) macluumaadka ku saabsan fal ambiyeedka.

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan CROP waxa aad ka heli kartaa bogga internetka ee Adeegga Sharciga ee Kolombiya (Columbia):

https://columbialegal.org/policy_reforms/crop/.